



Baaritaanka COVID-19, talaalka iyo kaalmada iyo xaashida xaqiiqda kaalmada dhibta waalidiinta

Baaritaanka iyo iskeli-yeelida (isolation)

Haddaad leedahay astaamaha COVID-19, waxaa waajiba **inaad isbaarto** ([get tested](#)) oo aad joogto guriga ilaa aad ka hesho natiijada. Ha aadin shaqo ama dukaamada.

Astaamaha COVID-19 waxaa ka mid ah:

- Xumad, dhaxan ama dhidid
- Qufac ama cuna-xanuun
- Neefsiga oo gabaasi kugu ah
- Sanka oo biya (duuf) ka socdaan
- Dareenka ama urka oo luma

Baaritaanka COVID-19 waa u lacag la'aan qof walba. Kan waxaa ku jira dadka aan haysan kaarka Medicare, sida kuwa booqashada ku jooga oo dibada ka yimid, shaqaalaha soogalootiga iyo magangelyo doonka.

Haddii baaritaankaagu muujiyo inaad qabto COVID-19, waxaa waajib kugu ah inaad (joogto) gurigaaga.

Haddii aad tahay qof u dhow qof qaba COVID-19 waxaa waajib kugu ah in aad is karantiinto (guriga joog) ilaa 14 berri iyo ilaa lagugula taliyo inaad ka bixi karto karantiinka taas oo uu ansixiyey Sarkaalka Amran ee Wasaarada Caafimaadka (Department of Health).

Haddii aad ku nooshahay, ama aad waqti la qaadatay, qof xiriir dhow la leh, waxaa lagu weydiin doonaa inaad guriga joogto.

Talaalka

Waxaad u baahan tahay inaad ogaato

- Qof walba oo jira 16 sanadood ama ka weyn ayaa qaadan kara talaalkooda COVID-19.
- Ballan samayso adigoo wacaya Khadka Coronavirus (Coronavirus Hotline) tel: [1800 675 398](tel:1800675398). Haddii aad u baahan tahay turjubaan, riix eber (0).
- Dadka jira 60 sanadood ama ka weyn waxaa la siin doonaa talaalka [AstraZeneca](#). Dadka qaarkiis oo qaba xaallad caafimaad oo mucayina waxay xaq u yeellan doonaan talaalka [Pfizer](#).
- Dadka jira 12 - 59 sanadood waxaa la siin talaalka [Pfizer](#).
- Taalka COVID-19 waa u lacag la'aan qof walba. Uma baahnid kaarka Medicare.
- Talaalku Khasab maaha. Waxaad dooran kartaa in lagu talaalo.
- Waxaa u baahan tahay laba qadar (irbadood) oo ah talaalka COVID-19 si uu u noqod wax ku ool.
- Markaad qaadato qadarka ugu horreeya, waxaa lagu sheegi doonaa marka aad qaadanayso qadarka labaad.
- Talaalada oo dhan si fiican oo taxadar leh ayaa loo tijaabiyey si loo xaqiijiyo inay yihiin amaan intaan loo ansixin in Australia laga isticmaalo.
- Haddii aad ka welwelsan tahay talaalkaaga ama in aad qaadato talaalka COVID-19, la hadal dhakhtarkaaga.

Kaalmo ayaa la heli karaa

Kaalmada dhibta

Haddii aad ka welwelsan tahay wixii ku saabsan luminta dakhligaaga (lacagta ku soo gasha) intaad sugayso natiijoyinka talaalka, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeellato \$450 COVID-19 oo ah kaalmada talaalka iskeli-yeelida. Tani waxay caawimaysaa inaad guriga joogto.

Haddii lagaa hello cudurka ama aad u dhowayd qof laga hellay, waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay lacag dhan \$1,500. Macluumaad intaas ka badan wac Coronavirus Hotline tel: [1800 675 398](tel:1800675398). Haddii aad u baahan tahay turjubaan, riix (0).

Haddii adiga ama qof aad taqaan uu welwelsan yahay ama dareen qabo, Waxaad ka wici kartaa Lifeline tel [13 11 14](tel:131114) ama Beyond Blue tel [1800 512 348](tel:1800512348). Haddii aad u baahan tahay turjubaan, ugu horray wac [131 450](tel:131450).

Haddii aad dareemayso kelinimo, waxaad ka wici kartaa Coronavirus Hotline tel: 1800 675 398 oo riix (3). Haddii aad u baahan tahay turjubaan, riix eber (0). Waxaa lagugu xiri doonaa tabaruc-bixiye ka socda Australian Red Cross kaas oo kugu xiri kara adeegyada kaalmada ee agagaarka.

- Kaalmada Baarista Coronavirus-ka oo dhan \$450 (Eray), ([\\$450 Coronavirus Testing Support \(Word\)](#))
- Lacagbixinta Khasaarada Fasaxa Safmarka oo dhan \$1500 (Eray), ([\\$1500 Pandemic Leave Disaster Payment \(Word\)](#))

Haddii aad u baahan tahay turjubaan, wac Khadka COVID-19 oo ah 1800 675 398 oo riix 0.